Wasaaradda Qorsheynta,
Maalgashiga iyo Horumarinta
Dhaqaalaha - Soomaaliya
Ministry of Planning, Investment
and Economic Development

# WARSIDAHA WASAARADDA
# BISHA LUULYO 2026

## DARDARGELINTA HIRGELINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA (NTP 2025–2029) IYO XOOJINTA ISKAASHIGA HORUMARINEED




@mopied

**Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha - Soomaaliya**
Ministry of Planning, Investment and Economic Development

# WARSIDAHA WASAARADDA
# BISHA LUULYO 2026

## DARDARGELINTA HIRGELINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA (NTP 2025–2029) IYO XOOJINTA ISKAASHIGA HORUMARINEED

# HORDHAC

Warsidaha bishan wuxuu soo bandhigayaa waxqabadkii ugu muhiimsanaa ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Dowladda Federaalka Soomaaliya intii lagu jiray bisha Luulyo 2026.

Bishan, Wasaaraddu waxay xoogga saartay dardargelinta hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), xoojinta isku-duwidda qorsheynta iyo deeqaha ee heer federaal iyo dowlad-goboleed, iyo kobcinta iskaashiga hay'adaha horumarinta iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay.

Warsiduhu wuxuu iftiiminayaa kulammo heer sare ah, shirar farsamo, aqoon-isweydaarsiyo, hawlo awood-dhisid iyo matalaad caalami ah; kuwaas oo xoojinaya hufnaanta, isla-xisaabtanka, qorsheynta ku saleysan xogta iyo hirgelinta mudnaanta qaranka.

# QODOBADA WARSIDAHA LUULYO 2026

**Qodobadii ugu muhiimsanaa**

- Dardargelinta warbixinta waxqabadka Xukuumadda DanQaran 2022–2026.
- Horumarinta wada-shaqeynta Dowladda Federaalka iyo dowlad-goboleedyada ee qorsheynta iyo isku-duwidda horumarinta.
- Matalaadda Soomaaliya ee Madasha Sare ee Siyaasadda Horumarinta Waarta (HLPF) iyo ECOSOC.
- Daahfurka warbixinta fursadaha maalgashi ee warshadaha Soomaaliya.
- Xoojinta iskaashiga bah-wadaagta horumarinta, ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo qurba-joogta Soomaaliyeed.
- Horumarinta awoodda shaqaalaha Wasaaradda iyo dhismaha guddiyada farsamo ee qorsheynta.
- Dib-u-eegista waxqabadka hoggaanka sare iyo mudnaanta istiraatiijiga ah ee Wasaaradda.

# WAXA KU JIRA WARSIDAHAN


- Waaxda Maalgashiga oo Dardargelinaysa Qorshe-howleedkeeda Sanadlaha ah
- Wasaaradda Qorshaynta iyo NIS Foundation oo xoojinaya iskaashiga taageeraya hirgelinta NTP 2025–2029
- Wasaaradda Qorshaynta iyo CARE International oo Xoojiyay Iskaashiga Istiraatiijiga ah
- Wasaaradda Qorsheynta oo Xoojisay Isku-duwidda Horumarinta ee Heer Dowlad-goboleed
- Wasaaradda Qorsheynta oo Qabatay Shirka Isku-duwidda Saddex-biloodlaha ah ee Hay'adaha Dowladda Federaalka
- Diyaarinta Warbixinta Waxqabadka Xukuumadda DanQaran oo Gashay Wejiyadii Ugu Muhiimsanaa
- Dhuusamareeb oo Martigelisay Shirka Wasaaradaha Wax-soo-saarka iyo Dhismaha Guddiyada Farsamo ee Qorsheynta Galmudug (SPTWGs)
- Soomaaliya oo Horumarkeeda iyo Aragtideeda Horumarineed Ku Soo Bandhigtay Madasha HLPF iyo ECOSOC
- Baydhabo oo Martigelisay Aqoon-isweydaarsi Lagu Xoojinayo Qorsheynta iyo Isku-duwidda Horumarinta
- Wasaaradda Qorsheynta oo Daahfurtay Warbixinta Fursadaha Maalgashi ee Warshadaha Soomaaliya
- Wasaaradda Qorsheynta oo Shaqaalaheeda u Qabatay Tababar ku Saabsan Hoggaaminta Isbeddelka
- Madasha Dowladda iyo Ganacsiga Gaarka loo Leeyahay oo Lagu Xoojinayo Hirgelinta NTP 2025–2029
- Wasaaradda Qorsheynta oo Soo Gabagabeysay Shirarkii Hannaanka Wadashaqeynta Tiirarka Qorshaha Isbeddelka Qaranka
- Hoggaanka Sare ee Wasaaradda oo Dib-u-eegay Waxqabadka iyo Mudnaanta Istiraatiijiga ah
- Agaasimaha Guud oo La Kulmay Shabakadda Qurba-joogta Soomaaliyeed ee Dib ugu Soo Laabatay Dalka



## WAAXDA MAALGASHIGA OO DARDARGELINAYSA QORSHE HOWLEEDKEEDA SANADLAHA AH

**29ka Luulyo 2026** – Maalin kaddib markii uu si rasmi ah ula wareegay xilka Agaasimaha Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Ismaaciil Cabdalla Cali ayaa kulankiisii ugu horreeyay la yeeshay madax-qaybeedyada iyo howl-wadeennada waaxda.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray dardargelinta hirgelinta qorshe-howleedka sanadlaha ah, iyadoo mudnaanta la siinayo hawlaha la fulinayo saddexda bilood ee soo socda.

Waaxda Maalgashigu waxay hormuud u tahay dadaallada Wasaaradda ee lagu horumarinayo jawiga maalgashiga, dhiirrigelinta maalgashiga gudaha iyo kan dibadda, iyo taageeridda koboca dhaqaale iyo shaqo-abuurka, si waafaqsan mudnaanta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).



# WASAARADDA QORSHAYNTA IYO NIS FOUNDATION OO XOOJINAYA ISKAASHIGA TAAGEERAYA HIRGELINTA NTP 2025–2029

**27-KA Luulyo 2026** – Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, ayaa kulan la yeeshay wafdi ka socday NIS Foundation, oo uu hoggaaminayay Wakiilka Hay'adda ee Soomaaliya, Mudane Qaasim Gaabow Ducaale. Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga istiraatiijiga ah ee labada dhinac si loo taageero hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyo mudnaanta horumarineed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Intii uu kulanku socday, labada dhinac waxay is dhaafsadeen aragtiyo ku saabsan xoojinta awoodda hay'adaha dowladda, horumarinta nidaamyada Kormeerka iyo Qiimaynta (M&E), hirgelinta Qaab-dhismeedka Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta (National M&E Framework), tayeynta nidaamyada xogta iyo xalalka dijitaalka ah, iyo horumarinta mashaariic wadajir ah oo gacan ka geysanaya xaqiijinta yoolalka NTP 2025–2029 iyo Himilooyinka Horumarka Waara (SDGs).

Kulanka ayaa ku soo dhammaaday is-afgarad ku saabsan in la sii xoojiyo iskaashiga labada dhinac, lana dardargeliyo wada-shaqeynta farsamo, isdhaafsiga aqoonta iyo diyaarinta qorshe-hawleedyo wadajir ah oo taageeraya qorsheynta, hirgelinta iyo la socodka barnaamijyada horumarinta dalka.



## WASAARADDA QORSHAYNTA IYO CARE INTERNATIONAL OO XOOJIYAY ISKAASHIGA ISTIRAATIIJIGA AH

**23-ka Luulyo 2026** – Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, ayaa kulan la yeeshay Agaasimaha Guud ee CARE International Soomaaliya, Marwo Ummy Dubow, si loo xoojiyo iskaashiga u dhexeeya Wasaaradda iyo CARE International.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray taageerada hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), xoojinta nidaamyada kormeerka iyo qiimaynta (M&E), dhisidda awoodda hay'adaha dowladda, kobcinta go'aan-qaadashada ku saleysan xog, iyo dardargelinta saxiixa Heshiiska Is-afgaradka (MoU), kaas oo qeexaya qaabka iskaashiga iyo wada-shaqeynta labada dhinac.

Labada dhinac ayaa adkeeyay muhiimadda iskaashi waara oo lagu taageerayo mudnaanta horumarineed ee dowladda, waxayna ku heshiiyeen in la sii xoojiyo wada-shaqeynta si loo dardargeliyo hirgelinta qorshayaasha mudnaanta leh ee dowladda.






## WASAARADDA QORSHEYNTA OO XOOJISAY ISKU-DUWIDDA HORUMARINTA EE HEER DOWLAD-GOBOLEED

**21–23 Luulyo 2026 –** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa xoojisay dadaallada lagu horumarinayo isku-duwidda horumarinta iyo deeqaha, iyadoo magaalada Dhuusamareeb iyo Laascaanood ku qabatay shirar iyo madallo lagu mideynayo dowladda, bah-wadaagta horumarinta, bulshada rayidka ah iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay si loo dardargeliyo fullinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Dhuusamareeb waxaa lagu qabtay Shirka Isku-duwidda Arrimaha Horumarinta iyo Gargaarka Bani'aadannimada, kaas oo dib loogu eegay horumarka la gaaray, caqabadaha jira iyo mudnaanta dib-u-habaynta. Sidoo kale, magaaladaas waxaa lagu qabtay Madasha Isku-xirka Dowladda iyo Ganacsiga Gaarka loo Leeyahay, taas oo diiradda lagu saaray dhiirrigelinta maalgashiga, kobcinta wada-shaqeynta iyo sare u qaadidda doorka ganacsiga ee kobaca dhaqaalaha.

Dhanka kale, magaalada Laascaanood waxaa ka furmay Shirarka Isku-duwidda Heer Dowlad-goboleed, halkaas oo hay'adaha dowladda iyo bulshada rayidka ahi ay dib ugu eegayeen horumarka labada tiir ee Maamul-wanaagga iyo Horumarinta Bulshada iyo Karaanka Aadanaha, iyagoo sidoo kale adkeeyay muhiimadda isku-waafajinta mudnaanta horumarinta ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed.

Shirarkan ayaa qayb ka ah dadaallada joogtada ah ee Wasaaradda ee lagu xoojinayo isku-duwidda deeqaha, iskaashiga bah-wadaagta horumarinta iyo ka-qaybgalka daneeyayaasha, si loo dardargeliyo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyo qorshayaasha horumarineed ee dowlad-goboleedyada.




# WASAARADDA QORSHEYNTA OO QABATAY SHIRKA ISKU-DUWIDDA SADDEX-BILOODLAHA AH EE HAY'ADAHA DOWLADDA FEDERAALKA

**21 Luulyo 2026 –** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa Muqdisho ku qabatay Shirka Isku-duwidda Saddex-biloodlaha ah ee Hay'adaha Dowladda Federaalka, kaas oo ay soo qabanqaabisay Waaxda Qorsheynta. Shirka ayaa ujeeddadiisu ahayd xoojinta wada-shaqeynta hay'adaha dowladda iyo is-waafajinta hirgelinta mudnaanta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Shirka waxaa furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, waxaana ka qayb galay Agaasimayaal Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha Qorsheynta ee wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda, iyo masuuliyiin farsamo. Kulanka ayaa lagu adkeeyay muhiimadda isku-duwidda waaxyaha qorsheynta, is-waafajinta qorshayaasha istaraatiijiga ah iyo qorshayaasha shaqo ee sanadlaha ah, iyo xoojinta iskaashiga hay'adaha dowladda.

Ka-qaybgalayaashu waxay sidoo kale falanqeeyeen Habraaca Qaran ee Qorsheynta Dowladda Federaalka, kaas oo lagu mideynayo hababka qorsheynta, kor loogu qaadayo tayada qorshayaasha hay'adaha dowladda, laguna xoojinayo isla xisaabtanka iyo hirgelinta mudnaanta horumarineed ee dalka.




# DIYAARINTA WARBIXINTA WAXQABADKA XUKUUMADDA DANQARAN OO GASHAY WEJIYADII UGU MUHIIMSANAA

**4–19 Luulyo 2026 –** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, iyadoo kaashanaysa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, ayaa si dardar leh u wadday geeddi-socodka diyaarinta Warbixinta Waxqabadka Xukuumadda DanQaran (2022–2026). Hawshan qaran ayaa ka bilaabatay daahfur rasmi ah 4-tii Luulyo, waxaana xigay kulamo farsamo, ururinta iyo xaqiijinta xogta, iyo dib-u-eegista waxqabadka wasaaradaha iyo hay'adaha Dowladda Federaalka.

Intii u dhexeysay 5–19 Luulyo, waxaa si isdaba joog ah loo qabtay kulamo farsamo oo lala yeeshay wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda si loo xaqiijiyo xogta iyo caddeymaha waxqabadka. Geeddi-socodku wuxuu galay wejiyada ugu muhiimsan ee falanqaynta, tayeynta iyo isku-dubbaridka xogta, iyadoo mudnaanta la siiyay soo saarista warbixin qaran oo sax ah, dhammaystiran, isla markaana ku dhisan caddeymo la xaqiijiyay.

Muddadaas, xarunta diyaarinta warbixinta waxaa booqday masuuliyiin sare oo dowladda ka tirsan, oo ay ka mid yihiin Wasiirka Qorsheynta, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo masuuliyiin kale. Mas'uuliyiintu waxay ku bogaadiyeen kooxaha farsamada dadaalka ay wadaan, iyagoo adkeeyay muhiimadda hubinta tayada, saxnaanta iyo isku-halleynta xogta si warbixinta kama dambaysta ahi ay si hufan uga tarjunto waxqabadkii Dowladda Federaalka Soomaaliya muddadii 2022–2026.

Warbixintan qaran ayaa noqon doonta dukumenti muhiim ah oo lagu cabbirayo heerka hirgelinta Barnaamijka Xukuumadda DanQaran, laguna xoojinayo hufnaanta, isla xisaabtanka iyo qorsheynta ku saleysan xog sugan iyo caddeymo.










TIIRKA 3AAD:
SOOMAALI
HESHIIS AH


Qorshaha
Isbeddelka
DAN-QARAN 2022 - 2026



## DHUUSAMAREEB OO MARTIGELISAY SHIRKA WASAARADAHA WAX-SOO-SAARKA IYO DHISMAHA GUDDIYADA FARSAMO EE QORSHEYNTA GALMUDUG (SPTWGS)

**18–21 Luulyo 2026** – Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Qorsheynta ee Dowlad-goboleedka Galmudug, ayaa magaalada Dhuusamareeb ku qabatay Shirka Wasaaradaha Wax-soo-saarka iyo Dhismaha Guddiyada Farsamo ee Qorsheynta Galmudug (SPTWGs).

Shirka waxaa furay Wasiirka Qorsheynta Galmudug, Mudane Cabdiraxmaan Axmed Heyle, iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, waxaana ka qayb galay Agaasimayaasha Guud iyo Agaasimayaasha Qorsheynta ee wasaaradaha Galmudug.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga hay'adaha dowladda, is-waafajinta qorshayaasha Dowlad-goboleedka Galmudug iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), iyo dhammaystirka Guddiyada Farsamo ee Qorsheynta (SPTWGs), kuwaas oo door muhiim ah ka qaadan doona isku-duwidda, hirgelinta iyo la socodka qorshayaasha horumarineed.



# SOOMAALIYA OO HORUMARKEEDA IYO ARAGTIDEEDA HORUMARINEED KU SOO BANDHIGTAY MADASHA HLPF IYO ECOSOC

**14–16 Luulyo 2026 –** Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa hoggaamiyay wafdi ka socday Dowladda Federaalka Soomaaliya oo ka qayb galay Shirka Heer Wasiir ee Golaha Dhaqaalaha iyo Arrimaha Bulshada ee Qaramada Midoobay (ECOSOC) iyo Madasha Siyaasadda Heerka Sare ee Horumarka Waara (HLPF) ee ka dhacday magaalada New York.

Intii uu shirku socday, Wasiirku wuxuu khudbad rasmi ah ka jeediyay Golaha ECOSOC, isagoo soo bandhigay horumarka Soomaaliya ka gaartay dib-u-habeynta dhaqaalaha, dowlad-dhiska, qorsheynta ku saleysan xogta iyo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029). Wuxuu sidoo kale adkeeyay baahida loo qabo iskaashi iyo maalgashi joogto ah si loo dardargeliyo hirgelinta Yoolalka Horumarka Waara (SDGs).

Wasiirku wuxuu kulamo laba geesood ah la yeeshay Xoghayaha Fulinta ee UNECA, Danjire Claver Gatete, iyo Wasiirka Horumarinta Caalamiga ah ee Norway, Åsmund Aukrust, kuwaas oo diiradda lagu saaray taageerada hirgelinta NTP 2025–2029, dib-u-habeynta dhaqaalaha, kobcinta maalgashiga, horumarinta dhaqaalaha buluugga ah, iyo xoojinta iskaashiga horumarinta.

Sidoo kale, Wasiirku wuxuu ka qayb galay Maalinta Afrika ee HLPF, halkaas oo lagu daahfuray Warbixinta Horumarka Waara ee Afrika 2026 (Africa Sustainable Development Report 2026). Munaasabadda ayuu Soomaaliya uga soo bandhigay horumarka laga gaaray hirgelinta mudnaanta qaranka iyo ajendayaasha 2030 iyo 2063, isagoo carrabka ku adkeeyay muhiimadda isdhexgalka dhaqaalaha Afrika, kobcinta maalgashiga, iyo doorka ganacsiga gaarka loo leeyahay ee horumar waara.







# BAYDHABO OO MARTIGELISAY AQOON-ISWEYDAARSI LAGU XOOJINAYO QORSHEYNTA IYO ISKU-DUWIDDA HORUMARINTA



**15–18 Luulyo 2026 –** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Qorsheynta ee Dowlad-goboleedka Koonfur Galbeed, ayaa magaalada Baydhabo ku qabatay aqoon-isweydaarsi afar maalmood socday oo lagu xoojinayo awoodda qorsheynta iyo isku-duwidda horumarinta.

Aqoon-isweydaarsiga waxaa ka qayb galay wasaaradaha wax-soo-saarka ee Dowlad-goboleedka Koonfur Galbeed, waxaana si rasmi ah u furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta Koonfur Galbeed, Mudane Cabdi Cali Dogey. Intii uu socday, waxaa diiradda lagu saaray xoojinta awoodda hay'adaha qorsheynta, isku-duwidda barnaamijyada horumarineed, iyo waafajinta qorshayaasha dowlad-goboleedka iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Aqoon-isweydaarsigu wuxuu qayb ka yahay dadaallada Wasaaradda ee lagu xoojinayo iskaashiga u dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda, kor loogu qaadayo awoodda qorsheynta, isla markaana lagu dardargelinayo hirgelinta qorshayaasha horumarineed ee dalka.




## WASAARADDA QORSHEYNTA OO DAAHFURTAY WARBIXINTA FURSADAHA MAALGASHI EE WARSHADAHA SOOMAALIYA

**15 Luulyo 2026** – Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Ismaaciil Ciid Maxamed, ayaa si rasmi ah u daahfuray Warbixinta Fursadaha Maalgashi ee Warshadaha Soomaaliya, oo ay diyaarisay Waaxda Maalgashiga (SOMINVEST) ee Wasaaradda.

Warbixintu waxay iftiiminaysaa fursadaha maalgashi ee ka jira warshadaha wax-soo-saarka, iyadoo ujeeddadeedu tahay soo jiidashada maalgashi cusub, kobcinta wax-soo-saarka gudaha, abuurista shaqooyin, iyo dardargelinta warshadaynta dalka si loo taageero koboc dhaqaale oo waara.

Warbixintan ayaa ah tii 13-aad ee taxanaha warbixinaha maalgashiga ee ay soo saarto SOMINVEST, waxayna ka tarjumaysaa dadaallada Wasaaradda ee lagu xoojinayo xogta maalgashiga, kor loogu qaadayo kalsoonida maalgashadayaasha, iyo taageeridda hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).




## WASAARADDA QORSHEYNTA OO SHAQAALAHEEDA U QABATAY TABABAR KU SAABSAN HOGGAAMINTA ISBEDDELKA

**13 Luulyo 2026 –** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa u qabatay Agaasimeyaasha Waaxyaha iyo qaar ka mid ah shaqaalaheeda tababar ku saabsan Hoggaaminta Isbeddelka (Transformational Leadership), kaas oo uu bixiyay khabiirka hoggaaminta Dr. Thomas George K.

Tababarka ayaa diiradda lagu saaray horumarinta hoggaan aragti fog leh, maaraynta isbeddelka, kobcinta hal-abuurka, iyo xoojinta wada-shaqeynta, si loo dhiso hay'ad leh hoggaan wax-ku-ool ah oo taageera hirgelinta mudnaanta horumarineed ee dowladda.

Tababarku wuxuu qayb ka yahay dadaallada joogtada ah ee Wasaaradda ay ku maalgelinayso horumarinta aqoonta iyo xirfadaha shaqaalaheeda, si loo xoojiyo tayada adeegyada hay'adeed loona taageero hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).



# MADASHA DOWLADDA IYO GANACSIGA GAARKA LOO LEEYAHAY OO LAGU XOOJINAYO HIRGELINTA NTP 2025–2029

**11 Luulyo 2026 –** Waaxda Isku-duwidda Deeqaha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa qabatay kulan u dhexeeya dowladda iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, kaas oo lagu xoojinayay iskaashiga lagu hirgelinayo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray kobcinta maalgashiga, dhiirrigelinta shaqo-abuurka, xoojinta isku-duwidda, iyo ballaarinta ka-qaybgalka ganacsiga gaarka loo leeyahay ee hirgelinta mudnaanta horumarineed ee dalka. Ka-qaybgalayaashu waxay isku raaceen in la sii xoojiyo wada-shaqeynta dowladda iyo ganacsiga si loo dardargeliyo koboc dhaqaale loo dhan yahay, loona abuuro jawi u sahlaya maalgashi iyo horumar waara.



## WASAARADDA QORSHEYNTA OO SOO GABAGABEYSAY SHIRARKII HANNAANKA WADASHAQEYNTA TIIRARKA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA

**6–9 Luulyo 2026 –** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa soo gabagabeysay shirarkii Hannaanka Wadashaqeynta Tiirarka Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), kuwaas oo muddo afar maalmood ah ka socday magaalada Muqdisho. Shirarkan, oo ay soo qabanqaabisay Waaxda Isku-duwidda Deeqaha, ayaa isu keenay hay'adaha Dowladda Federaalka, Qaramada Midoobay, saaxiibbada horumarinta, bulshada rayidka ah iyo daneeyayaal kale.

Mudadii shirarku socdeen, waxaa dib loogu eegay horumarka laga gaaray hirgelinta afarta tiir ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka, iyadoo diiradda la saaray xoojinta dowladnimada, horumarinta bulshada iyo karaanka aadanaha, isbeddelka dhaqaalaha waara, iyo deegaanka iyo adkeysiga isbeddelka cimilada. Doodaha ayaa sidoo kale xoogga saaray is-waafajinta taageerada bah-wadaagta horumarinta, isku-duwidda hay'adaha dowladda, iyo dejinta mudnaanta waxqabadyada si loo dardargeliyo hirgelinta qorshaha.

Shirarka waxaa furay, islamarkaana soo xiray, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, oo uga mahadceliyay dhammaan hay'adaha dowladda, saaxiibbada horumarinta iyo daneeyayaasha kaalintooda. Wuxuu adkeeyay in Wasaaraddu ay sii wadi doonto hoggaaminta iyo isku-duwidda Hannaanka Wadashaqeynta Tiirarka si loo xaqiijiyo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyo himilooyinka horumarineed ee dalka.









## HOGGAANKA SARE EE WASAARADDA OO DIB-U-EEGAY WAXQABADKA IYO MUDNAANTA ISTIRAATIIJIGA AH

**2 Luulyo 2026 –** Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa guddoomiyay kulanka Hoggaanka Sare ee Wasaaradda, kaas oo lagu qiimeeyay horumarka laga gaaray fulinta qorshayaasha shaqo iyo mudnaanta istiraatiijiga ah ee Wasaaradda.

Kulanka waxaa ka qayb galay Wasiir Ku-xigeenka, Agaasimaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo La-taliyayaasha Wasaaradda. Intii uu socday, waxaa dib loogu eegay heerka fulinta Liiska Ballanqaadyada Waxqabadka (Commitment Sheet), qorshayaasha shaqo ee waaxyaha, dib-u-eegista muddada dhexe ee Istiraatiijiyadda Shanta Sano ee Wasaaradda, iyo dadaallada lagu xoojinayo abaabulka kheyraadka iyo iskaashiga bah-wadaagta horumarinta.

Kulanka ayaa lagu soo gabagabeeyay adkeynta wada-shaqeynta iyo isku-duwidda gudaha Wasaaradda, iyadoo la dardargelinayo hirgelinta mudnaanta istiraatiijiga ah iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).



## AGAASIMAHA GUUD OO LA KULMAY SHABAKADDA QURBA-JOOGTA SOOMAALIYEED EE DIB UGU SOO LAABATAY DALKA

**2 Luulyo 2026 –** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, ayaa kulan isbarasho iyo xog-is-weydaarsi la yeeshay Shabakadda Qurba-joogta Soomaaliyeed ee Dib ugu Soo Laabatay Dalka, si loo xoojiyo doorka qurba-joogta ee horumarinta dhaqaalaha, kobcinta maalgashiga iyo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray sidii aqoonta, khibradda iyo maalgashiga qurba-joogta loogu waafajin lahaa mudnaanta horumarineed ee dalka, loona abuuri lahaa hannaan joogto ah oo ay kaga qayb qaataan qorsheynta, maalgashiga iyo horumarinta siyaasadaha.

Agaasimaha Guud ayaa ku tilmaamay qurba-joogta Soomaaliyeed hanti qaran oo door muhiim ah ka qaadan karta soo jiidashada maalgashiga, gudbinta aqoonta iyo teknoolojiyadda, kobcinta hal-abuurka, iyo dardargelinta horumar waara ee Soomaaliya.

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha - Soomaaliya

Ministry of Planning, Investment and Economic Development

# WARSIDAHA WASAARADDA

## BISHA LUULYO 2026

## DARDARGELINTA HIRGELINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA (NTP 2025–2029) IYO XOOJINTA ISKAASHIGA HORUMARINEED

@mopied

**Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha - Soomaaliya**

Ministry of Planning, Investment and Economic Development

# WARSIDAHA WASAARADDA BISHA LUULYO 2026

@mopied